
# Sidee buu jirkaagu wax uga qabtaa oo uu iskagana saaraa kiimikooyinka?


Soo gaarista ay dadka soo gaarto kiimikooyinka waxyeellada leh waxay u horseedi kartaa saameyn caafimaad oo xun. Jirka bini 'aadamka wuxuu adeegsadaa dhowr waddo si uu u qaato/nuugo, u qaybiyo, dheef shiid ku sameeyo (burburiyo), oo uuna jirka ka saaro kiimikooyin (ka takhaluso). Wadar ahaan, howlahaan waxaa lagu magacaaba habka jirku ku maareeyo sunta (toxicokinetics ) (ama mararka qaarkood ADME) ee kiimikada.




**Dhuuqidda/Jaqidda (Absorption):** Sida ay kiimikadu u gasho jirka ka dibna u sii gasho dhiigga mareenka.



**Qaybinta:** Noocyada unugyada jirka ee kiimikadu saamayso.



**Dheefshiidid (Metabolismis):** Habka jirku u jebiyo ama u beddelo Kiimikada.



**Iska saarid (Excretion):** Sida kiimikadu jirka uga baxdo, sida badan kaadida, saxarada, ama neefsasho (neef saarid).

- Qaabka jirku u qaato, u qaybiyo, u jajabiyo, oo uuna uga takhaluso kiimikooyinka waxay noqon kartaa qaab ka duwan qof kasta qofka kale waxayna sidoo kale ku xirantahay kiimikada nafteeda.
- Ogaanshaha habka jirku ku maareeyo sunta (toxicokinetics) waxay naga caawineysaa in aan fahamno sida jirkeenu ula macaamilo kiimikooyinka iyo waxa dhaca marka ay la kulmaan.

Qaybta Kormeerka Deegaanka iyo Qiimeynta (ESA)
(Environmental Surveillance and Assessment [ESA] Section)

(651) 201-4899 | health.risk@state.mn.us

DEPARTMENT OF HEALTH